



Warbixinta waxqabadka Ardayga ee Qarsoodiga ah

Tallaabooyinka Colorado ee Guusha Waxbarashada

Ardayga: **E184ALLG4PVFIRSTNAME
ASTNAME4**

SASID: **2019040085**

Taariqda dhalashada: **01/01/2007**

Dugsiga: **DUGSIGA HOOSE EE ALTURA (0214)**

Degmada: **ADAMS-ARAPAHOE 28J (0180)**


Gu'ga 2019

Farshaxanka/Qorista iyo Akhriska Luuqadda Ingiriisiga

Fasalada 4

Warbixintan buundadu waxay bixinaysaa macluumaad kusaabsan waxqabadka ardaygaaga ee Tallaabooyinka Colorado ee Guusha Tacliineed (CMAS) ee imtixaanka Farshaxanka/Qorista iyo Akhriska Luuqadda Ingiriisida.

- waxqabadka Ardaygaaga waxa u taagan miisaan buundo, heer hawlqabad, iyo darajada boqolkiiba. Buundooyinka waxa la saaraa miisaan si hawlqabadyada ardayda la isku barbardhigi karo sanado badan.
- Garaafka, miisaanka buundooyinka waxa u taagan dhaaymoonada. Fallaadhaha ku meersan dhaaymoonta ardaygaagu waxay muujinayaan cabbirka buundooyinka ardaygaagu laga yaabo inuu helo haddii imtixaanka la qaaday marar badan.
- Macluumaadka dugsiga, degmada, iyo gobolka ayaa la bixiyaa si markaas aad isku barbardhigi karto sida waxqabadka ilmahaaga marka loo eego waxqabadka kuwa kale. Boqolleyda ardayda heer waxqabad oo kasta gobolka oo dhan waxa lagu sheegaa garafaka hoostiisa.
- Xariiqaha dhibcaha ah waxay muujinayaan halka cabbirka buundooyinka loo qaybiyey heerka waxqabadka.
- Waxa lagu dhiirgelinayaa inaad kala hadasho warbixintan macallinka ardaygaaga.



Sharaxaha Heerka waxqabadka - Buuxiyey Filashooyinka

Ardayda **Buuxisay Filashooyinka** waxay ku taagan yihiin dhabbaha heerka fasalka xiga waxayna caadi ahaan muujiyeen waxa soo socda: **Akhriska**, nidaamka ay muujiyaan jawaabaha ardaygu waxay tilmaamayaan:

- Qoraal aad u murugsan: awoodda uu u leeyahay inuu guud ahaan saxo markii uu waydiinayo iyo/ama ka jawaabayo su'aalo, isagoo muujinaya faham guud ee qoraalka marka uu tixraacayo faahfaahin cad iyo tusaalayaal oo qoraalka kujira iyo marka uu sharaxayo gunaanad laga soo dheegtay qoraalka.
- Qoraal murugsan: awoodda uu u leeyahay inuu guud ahaan saxo markii uu waydiinayo iyo/ama ka jawaabayo su'aalo, isagoo muujinaya faham guud ee qoraalka marka uu tixraacayo faahfaahin cad iyo tusaalayaal oo qoraalka kujira iyo marka uu sharaxayo gunaanad laga soo dheegtay qoraalka.
- Qoraal isagoo diyaarsan la heli karo: awoodda uu u leeyahay inuu inta badan saxo markii uu waydiinayo iyo/ama ka jawaabayo su'aalo, isagoo muujinaya faham inta badan ee qoraalka marka uu tixraacayo faahfaahin cad iyo tusaalayaal oo qoraalka kujira iyo marka uu sharaxayo gunaanad laga soo dheegtay qoraalka.

Tibaaxda Qoran, ardaydu caadi ahaan waxay raacaan tilmaamaha waxayna bixiyaan soosaarista aragtiyo, oo ay kujirto marka uu caddaymo ka soo dheeganayo meelo kala duwan, iyadoo tusaalaynaha intooda badan ay muujinayaan abaabul ujeeddo leh oo inta badanna la maamulay. Ardaydu caadi ahaan:

- Waxay soosaari mawduuca iyo/ama qaybaha sheekada iyagoo isticmaalaya sababayn, faahfaahin, caddayn qoraal kusalaysan, iyo/ama sharaxaad.
- Waxay u soosaari mawduuca iyo/ama qaybaha sheekada qaab inta badan ku habboon shaqada iyo ujeedada.
- Waxay muujin abaabul ujeeddo leh oo inta badanna la maamulay oo ay kujiri karaan hordhac iyo/ama gunaanad.
- Isticmaalka erayada iyo oraahyada isku-xidhayaasha ah, erayada sifeeyayaasha ah, iyo/ama erayada maaddiga ah si ay u iftiimiyaan aragtiyo cadcad.

Aqoonta iyo isticmaalka Luuqadda iyo Heshiisyada, ardaydu caadi ahaan waxay muujin aqoonta ay u leeyihiin heshiisyada Ingiriisida Caadiga ah oo waafaqsan qoraal la tafatiray. Waxa jira qaladaad naxwaha iyo isticmaalka kuwaasi oo mararka qaar laga yaabo inay caqabad ku noqdaan fahamka.

Si aad u aragto qaybta dhammaystiran ee sharaxayaasha heerka waxqabadka (PLDs), booqo: http://www.cde.state.co.us/assessment/grade_4_english_language_arts_plds.

Ujeedada

Warbixintan waxay sharaxaysaa sida ardaygaagu ku yahay Heerarka Tacliineed ee Colorado ee Akhriska iyo Qorista.


Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan barnaamijka qiimaynta CMAS, booqo <http://www.cde.state.co.us/assessment/cmas>

Farshaxanka/Qorista iyo Akhriska Luuqadda Ingiriisiga




Qarsoodi

Waxqabad Hoosaadyada

- Waxqabadka guud ee ardaygaaga ee Akhriska waxa u taagan dhaaymoonta sare ee jaantuska hoose.
- Boqolkiiba dhibcaha ardaygaagu helo Qorista guud iyo qaybo-hoosaadyada Akhriska iyo Qorista waxa u taagan garaafka sare mid kasta oo kamid ah jaantusyada kale.
- Celcelisyada degmada iyo gobolka ayaa loo bixiyaa isbarbardhig dartood.
- Xariiqda taagan ee madaw waxay muujinaysaa celceliska boqolkiiba dhibcaha ay heleen ardayda gudbay heerka waxqabadka Buuxiyey Filashooyinka ee guud ahaan imtixaanka Farshaxanka/Qorista iyo Akhriska Luuqadda Ingiriisida.



Akhrinta



*Boqolkiiba dhibcaha la helo la isma barbardhigi karo sanado badan sababtoo ah shayadu waa isbaddalaan sanadbka ka dambeeya. Sidoo kale la isma barbardhigi karo qaybo-hoosaadyada sababtoo ah tirada shayada iyo adkaanta shayadu waxa dhici karta inayna sidooda sii ahaan.

